# Warbixin kooban oo ku saabsan baadhitaanka lagu sii ogaanaayo caafimaadka ilmaha uurka ku jira

Soomaali



## Baadhitaanka hore ee lagu sameeyo ilmaha uurka ku jira

Waxa mihiim ah in la ogaado in dhamaan badhitaanka lagu sameeyo ilmaha uurka ku jira uu yahay mid suurta gala hadii uu qofku rabo oo kaliya. Waxa markasta go'aanka iska leh in la sameeyo baadhitaanka iyo inkale qofka uurka leh.

Baadhitaanka hore ee lagu sii ogaanaayo caafimaadka uur jiifta ama ilmaha uurka ku jira waxa loola jeeda baadhitaanka lagu sameeyo haweenayda uurka leh ka hor inta aan la gaadhin todobaadka 22 aad ee uurka. Laakiin baadhitaanada noocan oo kale ah waxa intooda badan la sameeyaa wakhti intaan ka horeeya.

Hadii lagugu sameeyo baadhitaanka uur jiifta ama ilmaha uurka ku jira waxa lagu ogaan karaa natiijada khatar ta ah in ilmaha uurka ku jiraa khalad ku jiro mid ka mida koromosoomadiisa ama si kale oo qalad ah u abuurmey. Intaas kadib waxa lagu weydiin doonaa inaad rabto baadhitaano kale oo dheeri ah. Waxa lagu siin doonaa warbixin ku saabsan dhibaatooyinka xaga caafimaadka iyo kuwa bulsheed ee ku iman kara ilmaha koromosoomadiisa uu ku yimid qaladku iyo daryeelka caafimaad ee la siin karo. Markaa waxad fursad u heli doontaa inaad go'aanasto inaad ilmaha iska soo rido iyo inaad haysto. Hadii uu arinkaasi shaki kaaga jiro waxa haboon inaad ka fikirto inaad rabto inaad samayso baadhitaanka lagu sameeyo ilmaha uurka ku jira. Waxad sidoo kale maskaxda galisaa in baadhitaanka hore ee altarasound ama qalabka kombiyuutarka ee lagu baadho uurku ee qofka loogu yeedho usbuuca 12 – 13 ee uurka iyo baadhitaanka joogtada ah ee altarasound ee la sameeyo usbuuca 18 – 20 ee uurka inuu yahay baadhitaanka lagu sameeyo uurjiifta ama ilmaha uurka ku jira. Waxa kale oo mihiim ah inaad xusuusnaato in xaaladaha qaarkood ay adag tahay in wax lagu ogaado baadhitaanka lagu sameeyo ilmaha uurka ku jira. Xitaa hadii wax waliba ay caadi u muuqdaan marka la sameynayo baadhitaanka ayaa waxa jira khatar yar oo ah in uu jiro khalad saameyn ku yeelan kara caafimaadka ilmaha uurka ku jira.

Hadii aad hide u leedahay qaladaadka ku yimaada koromosoomyada ama jirooyinka la kala dhaxlo waxa haboon inaad wargaliso umulisada/dhakhtarka.

Adeega caafimaadka bulshadu wuxu bixiyaa baadhitaanka ilmaha uurka ku jira oo lacag la,aana oo la siiyo dhamaan dumarka uurka leh iyado lagu salaynayo qiimaynayta cafimaadkooda.
Hadii aad baadhitaanka ilmaha uurka ku jira ku samaysid goobaha daryeelka caafimaadka ee gaarka loo leyahay taasi waxay noqon kartaa in isla baadhitaankaasi oo kale aanay kugu casuumin xarumaha daryeelka caafimaadka ee bulshadu. Arintaasi waxaad waydiisa umulisadaada hadii ay adiga ku khusayso.

## TUL (Tidigt ultraljud), baadhitaanka hore ee altarasound ama qalabka kombiyuutarka ee lagu baadho uurku

la'aan u ah dhamaan dumarka uurka leh ee degan gobolka Västra Götaland. Altarasound ama qalabka kombiyuutarka ee lagu baadho uurku waxa laga saaraa caloosha waxaana lagu xaqiijiyaa mudada uurka, tirada caruurta ku jirta caloosha ama uurka iyo inuu jiro cilad kale oo khatara oo xaga abuurka ah. Waxa haboon in baadhitaanka la sameeyo mudada u dhaxaysa usbuuca uurka ee 12+4 – 13+6, laakiin waxa la balansan karaa ilaa inta laga gaadhaayo usbuuca 15+0. Suurtagal maaha in lagu ogaado cilada koromosoomyada marka la samaynayo TUL.

## KUB

KUB waa erey lasoo gaabiyay oo macnahiisu yahay baadhitaan ka kooban in la adeegsado (qalabka lagu baadho ilmaha uurka ku jira iyo baadhitaanada kemistriga ama kimiko la isku daray) kaasi oo ah hab lagu xisaabinaya sida ay suurto gal u tahay in mid ka mida koromosoomada uurjiiftu u qalad ku yimid, qalad kaasi oo noqon kara in koromosoom dheeri ah (trisomier) uu abuurmo. KUB waxa lagu xisaabin karaa suurtogalnimada ah in koromosoomada uurjiiftu ay yihiin trisom 21 (Down syndrom) iyo kuwa kale, kuwaasi oo la arko ama yimaada mar mar laakiin aad uga khatar san (trisomi 13 och 18).

Waxa aad mihiim u ah in la ogaado inaanu KUB ahayn hab la hubo oo lagu ogaan karo trisomi ee waa qalab lagu qiimeeyo suurtagalnimada trisomi.

Västra Götalandsregionen waxay bixinayaan ama kugu casuumayaan KUB lacag la'aan ah oo loogu talo galay dhamaan dumarka uurka leh ee buuxiyay 35 jir markii ay heleen caadadii ugu dambaysay. **Marka laga reebo**: marka laga hadlayo IVF uu la socdo ukunta ama samaynta ku deeqida embriyaha/bilowga abuuritaanka uurjifta. Madaama oo hadiyo jeer dadka loogu deeqayo ay yihiin dad da,doodu ka yar tahay 35 jir, isla markaana marka IVF ka wata ukunta la galinayo qaboojiyaha barafka ee lasoo doonanayo ka hor inta aan la buuxin 35 jir.

Usbuucyada uurku yahay 9+0 – 13+6 waxa dhiig laga qaadaa haweeneyda uurka leh si loo cabiro laba nooc oo barotiin ah. Baadhitaanka altrasounka ama kombiyuutarka lagu baadho ilmaha caloosha ku jira ayaa lagu sameeyaa usbuucyada uurka ee 11+3 – 13+6, kaas oo lagu cabirayo baladhka/balaca qaybta uu ka buuxo dareere oo ku taala qoorta ilmaha uurka ku jira, baadhitaankaasi oo loo yaqaano (nackuppklarning, NUPP) waa baadhitaan kombiyuutar la saaro ilmaha lagu ogaanaayo hadii ay jirto qalad xaga koromosoomada ah. Natiijada kasoo baxda badhitaanadaasi iyo haweeneyda uurka leh da'deeda waxa la barbar dhigaa suurtogalnimada in ilmaha uurka ku jira/uurjiiftu uu qabo trisomi. Sida ugu fiicaani waa in dhiiga la qaado qiyaastii usbuuca 10+0 iyo baadhitaanka kombiyuutarka ee altrasound in la qorsheeyo vecka 12+4 – 13+6, maxaa yeelay markaa kadib waxa la samayn karaa TUL leh tayo fiicaan oo wakhti leh.

Waa la samayn karaa baadhitaanka KUB hadii ay uurka ku jiraan wax ka badan hal cunug. Waxa marmar ka qaarkood adkaan karaa in aragti laga qaato qiimaynta natiijada kasoo baxda, waana taasi sabaabta ay ku haboon tahay in talo khaasa laga qaato.

Hadii baadhitaanka KUB uu muujiyo halis ah in ay kor u kacdo suurtogalnimada in ay jirto trisomi, waxa lagugu yeedhayaa ama martiqaadaya baadhitaano dhowra oo kale.

## NIPT (non-invasive prenatal test)

NIPT waa hab lagu baadhi karo karto dumarka uurka leh adiga oo ka qaadaya dhiig ilmaha uurka ku jira DNA diisa.
NIPT waa sida KUB oo kale baadhitaan sheegaya inta ay dhan tahay suurtogalnimada ah in ay jirto cilad ah inay ku timaado koromosoomada, laakiin hubaashiisu waa ka saraysaa inuu sax noqdo. Xaqiiqiyan sida KUB oo kale waxa NIPT la qiimeeyaa inta ay dhan tahay suurtogalnimada trisomy 13,18 iyo 21. NIPT waxa la sameyn karaa usbuuca uurka ee 10 iyo wixii ka dambeeya.

NIPT waxa baadhitaan ahaan loogu soo bandhigaa dumarka uurka leh:

- Hadii uu baadhitaanka KUB uu tuso ama muujiyo inay jirto halis ah in suurtogalnimada trisomy (1:51-1:200)
- Hadii biyaha uurka ku jiraa/tijaabada mandheerta laga qaado aanay ku haboonayn sababo kala duwan awgood (tusaale ahaan cagaarshowga/jooniska, HIV, cudurka dhiigbaxa)

NIPT laguma sameyn karo hadii haweenayda uurka leh

- Marka ay hooyadu caloosha ku sido wax hal ilmo ka badan.
- Marka ay hooyadu leedahay isbedel xaga koromosoomada ah
- Marka ay sadexdii bilood ee la soo dhaafay lagu sameeyay
    - Hadii laga badeley unugyada asliga ah (stamcellstransplantation)
    - Dhiig lagu shubay
    - Daaweynta shucaaca (Strålbehandling)
    - Carbinta ama adeegsiga dufaaca jidhkaee lagu daaweeyo xanuunada qaar (immunterapi)

## Baadhitaanka tijaabo kasoo qaadida biyaha uurka ku jira/baaritaanka tijaabo kasoo qaadida mandheerta

Baadhitaankan tijaabada waxa laga soo qaadaa ilma galeenka iyada oo lasii marayo caloosha. Waxa la adeegsada irbad yaroo dhuuban oo lagu soo qaado tijaabo laga soo qaado mandheerta ama unugyada biyaha uurka ku jira.
Baadhitaanada tijaabada biyaha uurka ku jira iyo baashitaanka tijaabada mandheerta waxa inta badan lagu baadhaa hab la adeegsanayo qalab ku siinaya jawaab hal usbuuc gudihiisa hadii ay ciladi ka jirto xaga koromosoomada trisomi 13, 18 och 21 (QF-PCR).

- Baadhitaanka biyaha uurjiifta waxa la sameyn karaa ugu horeyn todobaadka uurka ee 15+0.
- Baadhitaanka mandheerta waxa la sameyn karaa ugu horeyn todobaadka uurka ee 11+0.

Tijaabada la qaadayo waxay kordhin kartaa khatarta imaatinka dhicis ama in ilmuhu soo kasoo dhaco. < 0,5%

Baadhitaanka tijaabada waxa loogu talo galay oo la siiyaa hadii:

- Hadii baadhitaanka KUB uu muujiyo in suurtogalnimada ay ka sarayso 1:50, ama habka baadhitaanka koombiyuutraka loogu cabiro ilmaha uurka ku jira ee loo yaqaano (nackuppklarningen) waxa la cabirayaa >- 3,5mm, ama hadii NIPT uu tuso suurtogalnimada sare ee trisomi 13, 18 ama 21
- Baadhitaanka altrasounku ama kombiyuutarka araga iyo maqalka leh(ultraljud) marka uu sheego inuu jiro shaki laga qabo in hab dhismeedka shaki ku yimid.
- Marka aad hada ka hor dhashay ilmo ay ka qaldan yihiin koromosoomadu.
- Hadii aad hide u leedahay adigu/qofka uurka leh ama qof aad qaraabo tihiin cudurada la kala dhaxlo.

- Hadii aad buuxisay 35 jir isla markaana aanad rabin inaad samaeyso badhitaanka KUB, laakiin uu jiro rabitaan ah in lagugu sameeyo badhitaanka caadiga ah ee lagu sameeyo uurjiifta si loo ogaado in jiro isbedel ku yimid koromosoomada.

## Baadhitaanka sida joogtada ah loo sameeyo iyadoo la adeegsanayo ultrasoundka (Rutinultraljud)

Baadhitaanka ultrasoundka ama kombiyuutarka xubnaha jidhka lagu eego ama dhagaysto ee noocan oo kale ah waxa lacag la'aan lagu siiyaa dumarka uurka leh ee dagan Västra Götaland. Baadhitaan kani waa in lagu sameeyaa inta u dhaxaysa usbuuca 18-20, isla markaanaa waxa loo sameeyaa in:

- La go'aamiyo mudada uurku yahay iyo in la xisaabiyo taariikhda uu ilmuhu dhalan doono (hadii tan hore loo sameeyay markii la sameynayay baadhitaanka uurjiifta ee la sameeyo goor hore (TUL) looma baahna in la sameeyo xisaabin cusub).
- In la ogaado tirada ilmaha ku jira ilma galeenka ama uurka ku jira.
- In baadhitaan lagu sameeyo ilmaha uurka kujira si loo helo hadii ay jiraan cilad xaga hab dhismeedka ah oo khatar ah.
- La qiimeeyo booska mandheerta.

Ciladaha qaarkood ee xaga hab dhismeedka jidhka way fududahay in lagu arko ultrasound ama kombiyuutarka wax lagu baadho, isla markaana inta badan waala ogaadaa (hadii uu tusaale ahaan jiro qalooc weyn oo xaga xangulaha laf dhabarta). Ciladaha kale ee hab dhismeedka jidhka wey adag tahay in la ogaado (tusaale ahaan hadii ay jirto cilad xaga wadnaha ah). Dhamaan ciladaha jira oo dhan laguma ogaan karo ultrasoundka. Waxa iyaduna jirta oo dhacda mar mar dhif ah in ilmo caafimaad qaba oo ku jira uurka si qaldan loogu sheego cilad xaga hab dhismeedka jidhka. Waxa iyaduna jirta isbedalo ay adag tahay in qiimayn lagu sameeyo cawaaqiibtooda, isla markaana ay hubaal la'aantaasi ay kun abuurto dareen dhibaato.
Hadii qofka uurka le huu rabo inuu ogaado jinsiga ilmaha uurka ku jira fadlan wargali umulisada baadhitaanka kugu samaynaysa. Hadii jinsiga ilmaha la arki karo oo la hubo waxa ku wargalin doonta umulisada.

## Maxa dhacaya ka dib – baadhitaanka ka dib?

Marxaladaha intooda badan wax waliba si fiican ayaay u suurto galan marka la sameeyo baadhitaanada oo dhan ilmuhuna wuxuu ku dhashaa isaga oo caafimaad qaba. Hadii baadhitaanka kombiyuutarka ama ultrasoundka ee la adeegsanayo laga arko wax cilad ah, waxa uu dhakhtarku sameyn doonaa qiimayn kale oo dheeri ah. Waxa dhici karta in loo baahdo in la sameeyo badhitaano kale oo badan laguna waydiiyo in aad rabto in baadhitaan lagugu sameeyo si tijaabada laga soo qaadayo biyaha ilmuhu ku jiro ee ilma galeenka ku jira ama baadhitaanka tijaabada laga soo qaadaayo mandheerta. Hadii markaa kadib la arko inay jirto cilad xaga koromosoomka ah ama cilad xaga hab dhismeedka jidhka ah, waxa lagu siin doonaa macluumaad aad u badan iyo waliba fursad ah in lagaala hadlo waxa ay noqon karto. Qof kale oo arinka ka jooga dibada xaq uma laha inuu sameeyn ku yeesho go'aanka haweenayda uurka leh. Mararka qaarkood waxa wanaagsan si aad u gaadho go'aan adiga kuu fiican inaad la tashato dad badan oo aqoon u leh arinkan sida tusaale ahaan talo bixiye aqoon u leh hanaanka la iska dhaxlo (genetisk vägledare), dhakhtarka caruurta, qof aqoon u leh cilmi nafsiga ama la taliyaha xaga arimaha bulshada (kurator). Waxa kale oo qiimo weyn ku fadhiya inaad isticmaasho warbixinta ku qoran bogaaga hoos ku yaala si aad wax badan uga barato waxa loola jeedo inaad waalid u noqoto ilmo naafo ah.

## Hadii aad rabto inaad wax badan ka ogaato baadhitaaanada lagu sameeyo caafimaadka ilmaha uurka ku jira.

- Akhriso warbixinta uu isbitaalkaagu ku daabaco websaydhkooda.

Ka akhriso talooyinka bogaaga hoosta ku qoran/länktips:

http://www.1177.se/Fakta-och-rad/Undersokningar/Fosterdiagnostik/
http://www.svenskadownforeningen.se
http://www.nnkkf.n.nu (SNIF)
http://www.agrenska.se
http://www.gensvar.se
https://www.socialstyrelsen.se/stod-i-arbetet/funktionshinder/
https://www.socialstyrelsen.se/stod-i-arbetet/sallsynta-halsotillstand/
http://www.fub.se (Förening för utvecklingsstörda barn, ungdom och vuxna)